

Ku soo dhawoow Iskuullada Oslo

Maalinta koowaad ee iskuulku waa maalin taariikh gaar ah u leh ilmaha iyo qoyskiisaba. Iskuulka iyo waalidka ayaa si wadajir ah uga mas'uul ah sidii ilmuhu u heli lahaa bilow wacan. Haddii aad tahay waalidka ilmo bilaabaya iskuulka, waxannu rajaynaynaa inaad si firfircoon uga qaybqaadato sidii loo heli lahaa iskuul furfuran, oo ardaydu wax ku barato kuna qanacsan tahay. Waxannu ku dedaali doonnaa in ilmahaagu helo bilow iskuul oo wacan iyo rabitaan waxbarasho.



Carruurta oo dhan waxay xaq u leedahay inay hesho waxbarasho

Bey'ad iskuul oo wanaagsan, oo ammaan ah

Ardayda oo dhan waxay xaq u leedahay inay wanaag ka hesho iskuulka. Bey'ad iskuul oo wacan oo ammaan ah waxay horumarisaa caafimaadka, qanacsanaanta iyo waxbarashada. Shaqaalaha iskuulka iyo barmaamijka nashaadada ee iskuulka waxa ay la socon doonaan xaaladda ardayda. Haddii la caayo ama xadgudubyo loo geysto ilmahaaga ama qof aad taqaanid, waxannu rabnaa inaad u sheegtid iskuulka.

Waxbarasho xaq iyo waajib ah

Dhammaan carruurta deggan Noorway waxay xaq u leedahay kuna waajib ah qaadashada waxbarashada aasaasiga ah. Waalidka ayaa ka mas'uul ah in ilmuhu helo waxbarasho.

Iskuulka dhow iyo beddelashada iskuulka

Cinwaanka ardaygu deggan yahay ayaa lagu salaynayaa iskuulka uu ardaygu boos ka helayo. Si aad u beddelatid iskuulka, waa inaad warqad ama iimayl u soo dirtid iskuulka aad rabtid in ilmahaagu aado.

Sannad-dugsiyeedka

Ardaydu waxay iskuulka aadaysaa 190 maalmood halkii sannad-dugsiyeed. Adiga ayaa waalid ahaan ka mas'uul ah in ilmuhu uu maalin kasta yimaado iskuulka.

Maqnaansho xanuun

Haddii ardaygu xanuunsado oo iman karin, waa inaad u sheegtaan iskuulka. Haddii maqnaanshaha xanuunku soconayo in ka badan saddex maalmood, waxa haboon in la keeno caddayn dhakhtareed. Marka maqnaanshaha xanuunku yahay mid muddo dheer ah, waa in iskuulka iyo waalidku eegaan in loo baahan yahay waxbarasho lagu bixiyo guriga.

Fasax-qaadasho

Iskuullada Oslo waxay leeyihiin xeerar gaar ah oo khuseeya fasaxa laga qaadano iskuulka. Caadi ahaan ardayda looma fasaxo waxyaalaha ay ka mid ka yihiin fasax caadi ah, fasax tabobbar ama fasax ku beegan maalmaha imtixaannada. Haddii ardaygu uu iskuulka ka maqnaado in ka badan 14 maalmood waxa ardayga laga saarayaa iskuulka.

Xeerarka asluubta

Iskuullada Oslo waxa ka dhexeeya xeerarka asluubta iyo habdhaqanka. Iskuulku waxa uu ku darsan karaa xeerar dheeraad ah. Xeerarka waxa iyana ku qoran talaabooyinka uu iskuulku qaadayo haddii ardaygu ku xadgudbo xeerarka.

Shirarka waalidiinta

Wadashaqayn wacan oo dhex marta iskuulka iyo guriga waxa ay fure u tahay horummarka iyo qanacsanaanta ardayga. Shirarka waalidiinta waxa iskuulku ku bixiyaa macluumaad ku saabsan hababka loo shaqeeyo iyo qaabka loo nidaamiyey waxbaridda. Shirarkaas waxa kale oo lagaga hadlaa bey'adda fasallada iyo iskuulka, waalidkuna waxay ka hadli karaan mawduucyada markaas jira.

Adeegga caafimaadka ee iskuulka iyo adeegga caafimaadka ilkaha

Iskuulladu waxay leeyihiin kaalkaalisoo caafimaad oo ay ardayda iyo waalidiintu la xidhiidhi karaan. Adeegga caafimaadka ee iskuullada waxa uu bixiyaa tallaallo bilaash ah iyo tilmaamo caafimaad oo la siiyo ardayda. Ardaydu waxa ay xaq u leedahay in bilaash lagu daweeyo ilkahooda ilaa iyo marka ay buuxinayaan 18 jir. Arday kasta waxa loogu yeedhayaa ballan dhakhtar ilko. Kuwii aan rabin inay isticmaalaan adeegga caafimaadka ilkaha ee dawladda, waa inay iskood iska bixiyaan kharashka.

KA HOR BILAABIDDA ISKUULKA WAXA FIICAN IN AY CARRUURTU SII BARATO:

- ✓ Inay labbisato oo xidhato xadhigga kabaha
- ✓ Iskeed u aadi karto musqusha
- ✓ Inay dharka si nidaamsan u dhigtaan halka dharka lagu rito
- ✓ Inay nidaamiyaan alaabta ugu jirta boorsada
- ✓ Inay markooda sugaan
- ✓ Inay bartaan sida loo cuno cuntada loo qaato iskuulka

Ardaydu maxay baranayaan, qaabkee ayayna u baranayaan?

Maaddooyinka iyo aqoonta

Carruurta waa inay sannad-dugsiyeedyada u horreeya bartaan aqoonta aasaasiga ah, sida akhrinta, qoridda iyo xisaabinta. Waa inay iyana bartaan wadashaqaynta, is-dhegaysiga, sheegaan fikradahooda iyo aragtitooda iyo inay noqdaan saaxiib wacan.

AQOONTA AASAASIGA AH

- ★ akhrinta
- ★ qoridda
- ★ xisaabinta
- ★ isticmaalida qalabka dijitaalka ah
- ★ in af ahaan loo sheegi karo waxa la rabo

MAADDOOYINKA FASALLADA

1-AAD IYO 2-AAD

- ★ Af-noorweejiga
- ★ Xisaabta
- ★ Sayniska
- ★ Af-ingiriisiga
- ★ Cilmiga bulshada
- ★ Farshaxanka iyo farsamada gacanta
- ★ Muusiga
- ★ Jimicsiga
- ★ Masiixiga, diimaha, aragti-noleedyada iyo akhlaaqda (KRLE)



Fududaynta waxbarashada

Waa in ardayda loo fududeeyo waxbarashada iyadoo loo eegayo kartidooda iyo awooddooda. Ardayda waxa wax loo barayaa qaabab kala duwan – iyadoo fasalka oo dhan la jooga, ka mid ah koox yar iyo meel ka baxsan fasalka, keligood iyo macallinka ama iyadoo safar u raacaya fasalkooda. Ardaydu waa inay dareento inay ka mid tahay ardayda kale, inkastoo waxbarashadu tahay mid hadba lagu salaynayo baahida ardayga.

Wax barid gaar ah

Ardayda aan wax ku baran ama ku baran karin barmaamijka waxbarashada ee caadiga ah, waxa ay xaq u leeyihiin in si gaar ah wax loo baro. Iskuulka ayaa eegaya in ardaygu u baahan yahay wax barid gaar ah, waxaanay u diri karaan adeegga cilminafsi-ga- waxbarashada (PPT) si uu khabiiir qiimayn ugu sameeyo.

Ardayda afkooda hooyo yahay af kale

Ardayda aanu afkooda hooyo ahayn af-noorweejiga iyo af-saamiga waxay xaq u leeyihiin in si gaar ah loo baro af-noorweejiga inta ay ka baranayaan af-noorweejiga ku filan oo ay kula socon karaan waxbarashada. Ardayda waxa qiimayn lagu samaynayaa marka ay bilaabaan iskuulka. Waxa la siin karaa in wax barid la xoojiyey lagu dhex siiyo fasalka iyo/ama iyaga oo ku dhex jira kooxo gaar ah. Haddii laga maarmi waayona waxa ay ardaydu xaq u yeelanayaan baridda afka hooyo iyo/ama in wax lagu baro labo af.

Qiimaynta ardayga iyo wadhadalka horumarka ardayga

Waa in iskuulku la socdo horumarka maaddiga ah iyo midka bulshannimada ah ee ardaygu sameeyo. Waa in ardayda loo sheego meesha ay ku fiican yihiin iyo meesha uga baahan shaqo dheeraad ah. Ardayda waxa la siinayaa qiimayn ah maaddooyinka oo dhan iyo nidaamka iyo asluubta oo la samaynayo xilliga kala badhka sanad-dugsiyeedka. Maammulaha iskuulka ayaa go'aaminaya in qiimaynta noqonayso qoraal iyo/ama af ahaan. Qiimaynta sannadka badhkii ah waxa lagu bixin karaa wadhadallada lala yeesho ardayga, kuwaas oo dhexmaraya macallinka iyo ardayga ugu yaraan sannadkii labo jeer, iyo wadhadallada horumarka ardayga oo lala yeelanayo waalidka.

Dabaasha

Dabaashu waa qayb ka mid ah maaddada jimicsiga, laakiin iskuulka iyo guriga waxa mas'uuliyad wadajir ah ka saaran tahay sidii ardaydu ula qabsan lahayd biyaha oo u baran lahayd dabaasha. Waa muhiim in carruurta marka ay yar yihiin biyaha la baro oo ay ammaan ku dareemaan.

BARMAAMIJKA NASHAADADA EE ISKUULKA (AKS)

AKS waa barmaamijka wakhti firaaqada ee ka horreeya kana dambeeya wakhtiga iskuulka, oo la furo 1-da ogoosto. Ardayda iskuullada bilaabaysa badankooda xiriirka ugu horreeya ee ay iskuulka la yeeshaan waa AKS. AKS waxay ka qaybqaadanaysaa horumarka maaddiga ah iyo la dhaqanka dadka ah ee carruurta samaynayso, iyadoo adeegsanaya cayaar iyo wax barid ay la kaashanayaan iskuulka. Waa in aad boos ka codsatid. Ardayda fasallada 1-aad ee 69 iskuul waxa ay sannad-dugsiyeedka 2018/2019 helayaan AKS bilaash ah.